

# Magacaabista Laba-luqadood ee parnaamij-ka Early Achievers

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo

## Waa maxay macnaha Magacaabista Labada-Luuqadood?

Barashada laba-luqadood waa hab ay carruurtu ku bartaan farbarashada, nuxurka, iyo dhaqanka laba-luqadood, badiyaa Af-Ingiriis-ka iyo luqaddo kale ee lagaga hadlo bulshada dhexdeeda. Naqshadaynta Laba-luqadood ee parnaamij-ka Early Achievers waxay aqoonsan tahay barnaamijyada la shaqeeya carruurta iyo qoysaska luqadaha badan ku hadla, ee jawiga barashada luqadda, si ay u daboolaan xoogooda iyo baahidooda gaarka ah.

## Yaa codsan kara Magacaabidda Naqshadeynta Labada-Luuqadood?

Barnaamijyada Early Achievers waxay codsan karaan Magacaabidda Labada-Luuqadood.

## Maxaan u baahanahay inaan ogaado ka hor inta aanan codsan Magacaabida Laba-luqadood?

Tallaabada ugu horreysa, barnaamijyadu waxay ballan-qaadayaan inay la kulmaan [Heerarka Labada-Luuqadood iyo Hababka ugu Wanaagsan](#).

Bixiyeyasha waa inay muujiyaan ka go'naanshiyaha barnaamijyada laba-luqadood ah ee soo socda ka hor inta aan la ansixin:

- Ugu yaraan hal deegaan oo waxbarasho ayaa 50-90% maalintii la qaata carruurta ku hadasha luqadda lammaanaha ee aan Af-Ingiriisiga ahayn; iyo
- Ugu yaraan hal ilmo oo diiwaangashan oo guriga ku hadla luqad aan Ingiriisi ahayn; iyo
- Wawa jira ugu yaraan hal xubin oo ka tirsan shaqaalaha laba-luqadood ah oo bixiya daryeel, waxbarid, iyo wada xidhiidhka luqadda lamaanaha; AMA
- Waa barnaamij dib u soo noolayn qabyaaladeed oo hal macalin ku bixiyo daryeelka afka hooyo ee qabiilka (tribal language).

## Sideen u codsadaa Magacaabista Labada-Luuqadood?

Barnaamijyadu waxay codsan karaan Magacaabista Labada-Luuqadood ee CECI, [Tababaraha Washington iyo Warbaahinta Bulshada](#) (oo hore loogu yaqaanay Coaching Fellow).



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## **Waa maxay run ahaantii Abaalmarinta Magacaabista Labada-Luuqadood?**

Xeerka [Fair Start for Kids](#) Act wuxuu faraya DCYF inay abuurto Qorshe Labada-luuqadood oo ah, oo ay maalgeliyaan bixiyayaasha xaqa u leh si loo horumariyo taageerada luqadda ee deegaanka waxbarashada.

## **Yaa u qalma Abaalmarinta Magacaabista Labada-Luuqadood?**

Marka maalgelinta la helo, shakhsiyadka soo socda ayaa laga yaabaa inay u qalmaan abaal-marin:

- Bixiyayaasha laysan-ka heysta ama shahaado haysta ee aqbala kaalmada daryeelka ilmaha ee gobolka. Tani waxay muujinaysaa in barnaamijku codsaday lacag bixin 12 bilood ee la soo dhaafay.
- Waxbarashada Hore iyo Barnaamijka Caawinta Waxbarashada Hore (ECEAP).
- Kala horrayntu waxay ku salaysnaan doontaa [Xasilinta Xannaanada Ilmaha](#).

## **Waa maxay qiimaha Abaalmarinta Magacaabista Labada-Luuqadood?**

Sida maalgelintu u ogolaato, abaal-marinaha waxaa lagu bixiyaa jawi waxbarasho ama fasal kasta. Barnaamijyada leh aagag waxbarasho oo kala duwan ayaa laga yaabaa inay helaan abaal-marin mid kasta oo ka mid ah goobahooda waxbarasho ee laba-luuqadood ah, illaa iyo toban sannadkii maalgelinta.

- Barnaamijyada labada luuqadood waxay xaq u yeelan karaan ilaa \$2,700 deegaankii waxbarasho.
- Barnaamijyada soo noolaynta labda-luuqadood qabiilka (tribal language) waxay heli karaan ilaa \$4,100 degmo dugsiyeed-ka. DCYF waxay aqoonsan tahay in barnaamijyada soo noolaynta luqadda qabyaaladdu ay u baahan yihiin maalgelin la taaban karo si loo guuleysto.

## **Maxaad ku samayn kartaa Abaalmarinta Magacaabista Labada-Luuqadood?**

Abaalmarinta waxaa loo isticmaali karaa ujeedooyinka soo socda:

- Mushaharka shaqaalaha waxbarashada labada-luuqadood
- Waqtiga horumarinta xirfadeed iyo qorsheynta
- Manhajka iyo agabka waxbaridda ee la xidhiidha labada-luuqadood ku hadasha
- Kharashyada kale ee la xidhiidha si kor loogu qaado waxbarashada labada-luuqadood

## **Sidee bay u egyihii warqadaha iyo lacag bixinta?**

Rasiidhada iibka ee lagu sameeyay maalgelinta Abaalmarinta Magacaabista Labada-luuqadood waa in la lahadaan todoba (7) sano. DCYF waxay xaq u leedahay inay codsato rasiidhada iibka abaal-marinaha labada-luuqadood. Haddii rasiidhada iyo dukumeentiga aan la bixin markii la codsado, tas-hiilaadka waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay dib u bixiyaan qayb ama dhammaan abaal-marintii Gobolka Washington. Abaalmarinnada labada-luuqadood looma isticmaali karo soo celinta iibsiyada la sameeyay ka hor inta aan abaalmarinta la kasban.

**Haddii maalgelintu dhammaato, weli ma codsan karaa Magacaabista Labada-Luuqadood?**

Haa Ka qaybgalayaasha Early Achievers waxay xaq u leeyihii inay codsadaan magacaabid, maalgelinta waxaa lagu jiheeyaa aagagga waxbarashada mudnaanta leh sida lacagtlu u oggolaato. Xitaa haddii maalgelintu dhammaato, barnaamijyada waa la dhisi doonaa.

**Su'aalo? DCYF waxaa lagala xiriiri karaa [merit@dcyf.wa.gov](mailto:merit@dcyf.wa.gov).**